QAAYAHAAGA
DOORBIDKAAGA
DOORASHADAADA

(SOMALI)

# Ikhtiyaaradda Qallitaanka Kaansarka Naaska

*Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada ama Naas Saarid Dhammeystiran*







**For “Breast Cancer Surgery Options” in English, see can-ah-77672.**

# Xubnaha Kooxdaada Daryeelka Caafimaadka

- **Dhakhtarka Qallitaanka Naaska**
  Dhakhtarka qallitaanka ayaa kaala hadli doona ikhtiyaarada qallitaanka daweynta ah oo kaa caawin doona in la garto qorshaha daweyn ee kuugu fiican.

- **Dhakhtarka Qalliinka Qurxinta**
  Dhakhtarka qalliinka qurxinta ayaa kula kulmi doona haddii ad dooratid in laguu sameeyo dib-u-dhisid naas si loo dhiso naaskaaga.

- **Dakhtarka Dawo ku Daweynta Kaansarka (Medical Oncologist)**
  Dhakhtarka daweynta kaansarka ayaa kula kulmi doona haddii qorshahaaga daweynta u ku jiro qaadashada dawo. Daawadan waxaa ku jiri kara kemotherabi, endocrine therapy, ama labadaba (eeg bogga 16).

- **Bixiyaha waxqabadka sare**
  Takhtarka takhasuska sare wuxuu daaweyn karaa jirooyinka iyo cudurada sida kansarka naasaha. Dhaqtarka takhasuska sare leh iyo dhaqtarka waxay u wada shaqeeyaan koox ahaan. Bixiyeyaasha ku-meel-gaadhka ah ee horay loo sii wado waxaa ka mid ah kalkaaliyeyaal caafimaad oo takhasus leh, kalkaaliyeyaal caafimaad, ama kalkaaliyeyaal takhtar.

  Waxaa laga yaabaa inaad la shaqeysid adeeg bixiye horumarsan intaad isbitaalka joogto ama ballanta dabagalka ah.

- **Dhakhtarka Raajo ku Daweynta Kaansarka (Radiation Oncologist)**
  Dhakhtarka Raajo ku Daweynta Kaansarka ayaa kula kulmi doona haddii qorshahaaga daweynta ay ku jirto ku daweynta raajada (fiiri erey-bixinta ku taalla bogga 17).

- **Kalkaaliye caafimaad Navigator**
  wuxuu yahay kalkaaliye caafimaad oo diiwaangashan kaas oo ku caawin doona, ku bari doona kuna hagi doona inta lagu jiro daaweynta.

- **Kooxda daryeelka dhaqan celinta kansarka**
  Xubnaha kooxda daryeelka dhaqancelinta kansarku waxay kaa caawin karaan inaad dib u soo ceshato ama aad u wanaajiso awoodaha aad dareento inay isbeddeleen taasoo ay ugu wacan tahay kansarkaaga ama daaweynta kansarka. Waxay kaa caawin karaan inaad ilaaliso ama aad dib ula soo noqoto xornimadaada oo aad ugu raaxaysato noloshaada sida ugu fiican.

  Kooxda daryeelka waxaa ku jiri kara: daawada jirka iyo bixiyeyaasha baxnaaninta, daaweeyeyaasha jireed, daaweeyayaasha shaqada iyo daaweynta lymphedema.

- **Kalkaaliye caafimaad oo diiwaangashan**
  Kalkaaliye caafimaad oo diiwaangashan ayaa ku siin doona iskuna dubbaridi doona daryeelkaaga gaarka ah. Kalkaalisadu waxay ku bari doontaa cudurkaaga kansarka iyo daaweynta, waxayna ku siin doontaa taageero adiga iyo qoyskaaga.

# Fahamka Kaansarka Naaska




© Allina Health System

**Qanjirka 'sintinel lymph node (yada) waa nuguska ugu horreeya ee nuugaya naaska.**

Kansarku waa cudur unugyada jidhku u koraan xakamaynta la'aan. Marka kansarku ka bilowdo naaska, waxaa loo yaqaan kansarka naasaha. Kansarka naasaha waxaa laga heli karaa tuubbooyinka ama lobules-ka. Mararka qaarkood wuxuu ku jirtaa labada aag. Kansarka naasuhu waa kansarka ugu badan ee haweenka ku dhaca.



© Allina Health System

**Cadka naaska ee caadi ah**

- Unugyadu way caafimaad qabaan.

**Kaansar naas oo aan faafin (Noninvasive breast cancer)**

- Unugyada kaansarka waxa kaliya ee laga helaa marinnada.
- Kan waa loo yaqaanaa kaansarka marinnada naaska (ductal carcinoma in situ) (DCIS).

**Kaansar naas oo faafay (Invasive breast cancer)**

- Unugyada kaansarka ee ku jira marinnada waxay ku fideen cadka ka dhow aagga.

# Ikhtiyaarka Qallitaanka Daweyn ah ee Kaansarka Naaska

Waxa jira laba nooc qallitaan oo lagu daweeyo kaansarka naaska: qayb-saarid naas iyo naas saaridda dhammeystiran. Dhakhtarkaaga qaliinka ayaa kula eegi doona labada doorasho.

Ma waxad u janjeedhaa mid ka mid ah ikhtiyaarada qallitaanka?

## Qayb-saarid Naas (Qallitaan Naaska Wax ka Hadhaan)



© Allina Health System

**Ka-dib qayb-saarista naaska, waxad calaamad nabar ku lahaan doontaa naaskaaga taasoo u dhow meesha u kaansarku ku jiray. Waxa laga yaabaa inad calaamad nabar oo labaad ku lahaatid kilkishaada haddii dhakharkaaga qallitaanku u baahdo inu saaro qaar ka mid ah nudahaaga limfiga.**

Qayb-saaridda naasku waa qallitaan lagu saarayo qayb ka tirsan naaskaaga. Waxa la saaraa kaansarka iyo in yar oo ah cad naas oo caafimaad qaba oo ku wareegsan kaansarka. Cadkan caafimaad qaba waxa la yidhaahdaa qarka.

Badi haweenku waxay u baahan yihiin cilaajka raajada ka-dib qayb-saarid naas. Cilaajka raajadu wuxu kaa gargaarayaa inu yaraado suurtogalka kaansarka naaska oo dib ugu soo noqda isla naaskaas.

Waxaad qaadan doontaa daaweynta shucaaca maalin kasta Isniin ilaa Jimcaha. Daaweynta shucaaca waxay socotaa ilaa 4 toddobaad. Dhakhtarkaaga shucaaca ah ee kansarka ayaa kaala hadli doona qorshaha daaweynta.

Haweenka qaarkood ee da'doodu ka weyn tahay 70 jir ee qaba kansarro yaryar ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay sameeyaan lumpectomy iyadoon lagu daaweyn shucaaca. Kooxdaada ayaa go'aan ka gaari doonta haddii tani ay adiga kuu haboon tahay.

## Qararka

Inta lagu jiro qallitaanka, dhakhtarkaaga qallitaanku wuxu saari doonaa aag ah unugyo caadi ah oo ku wareegsan unugyada kaansarka. Tani waxa loo sameynayaa waa in la hubiyo in dhammaan unugyada kaansarka la saaro.

Wareegga ah unugyo caadi ah waxa loo yaqaanaa qarka.

- Haddii aanay unugyo kaansar ah ku jirin qarka, waxa loo yaqaano qar taban (negative) ama waxba laga helin, ama saafi ah.
- Haddii ay unugyo kaansar ku jiraan qarka waxa loo yaqaanaa qar togan (positive) ama wax laga helay, ama aan saafi ahayn.

Qararkaaga waa la fiirin doonaa haddii ad dooratid qayb-saarid naas ama saarid naas oo dhammeystiran.

Waxay qaadataa dhawr maalmood ka dib qalliinka si aad u hesho natiijada kama dambaysta ah ee xadkaaga. Waxaad arki kartaa natiijooyinkaaga markaad gasho akoonkaaga Allina Health.

Daryeel bixiyahaaga caafimaadka ayaa ku soo wici doona, badanaa 24 saac gudahooda ee natiijadaada la soo dhejiyo, si uu dib kula eego. Waxa kale oo aad heli doontaa nuqul daabacan iyo dib u eegis booqashadaada ugu horreysa ee qalliinka ka dib.

# Ikhtiyaarka Qallitaanka Daweyn ah ee Kaansarka Naaska
## (sii socda)




**Qar taban/saafi ah: Ma jiraan unugyo kaansar oo ku jira cidhifka dibadda ee cadka la saaray.**




© Allina Health System

**Qar togan/aan saafi ahayn: Waxa jira unugyo kaansar oo ku jira cidhifka dibadda ee cadka la saaray.**

# Ikhtiyaarka Qallitaanka Daweyn ah ee Kaansarka Naaska
## (sii socda)

### Qalitaanka naasaha

Kani waa qalitaan lagaa saarayo naaskaaga oo dhan. Tan waxaa ku jiri kara ibtaada iyo areola.

Waxaad dooran kartaa in dib loo dhiso naaska si dib loogu dhiso naaskaaga. Dib u dhiska naasuhu wuxuu ku lug leeyahay qalliinno isdaba joog ah oo qaadan kara 1 ilaa 2 sano si loo dhammaystiro. Waqtigu wuxuu ku xirnaan doonaa baahidaada daaweynta ee kale (kiimoteraabiga, daaweynta shucaaca) qalitaanka naasaha ka dib.

Dhakhtarka qaliinka balaastigga ah ayaa kula kulmi kara hadaad rabto inaad waxbadan ka barato xulashooyinka kala duwan.

Si aad wax badan uga ogaato dib u dhiska naasaha, eeg bogga 6.



© Allina Health System

**Qalitaanka naasaha iyo dib u dhiska kadib: Waxaad nabar ku yeelan doontaa laabtaada halka naaskaagu yaalay. Waxaad waayi doontaa dareenka naasahaaga dabiiciga ah iyo muuqaalka. Haddii qanjirada loo baahan yahay in lagu saaro mastektomi, tan waxaa badanaa lagu sameeyaa isla meeshii la qalay.**

### Goorta Laga Yaabo In Naas Saarid Dhammeystiran Ay Sax Tahay

Dhakhtarkaaga qallitaanka ayaa laga yaabaa inu ku taliyo naas saarid dhammeystiran haddii:

- qayb-saarid naas ay saarayso qayb weyn oo ah naaskaaga. Tani waxay ku xidhan tahay cabbirka kaansarka iyo naaskaaga, iyo goobta ku jiro kaansarkaagu.
- waxa jira 2 aag kaansar ama badan oo ku jira naaskaaga
- waxaad leedahay isbeddel hidde ah oo lala xiriirinayo halista sare ee kansarka. Waxaad dhaxashay isbeddel hidde ah oo kordhin kara halista aad ugu jirto kansarka naasaha labaad ee mustaqbalka.
- waxad kugu jira hiddo-sidaha kaansarka naaska. Tani waxay kordhinaysaa halista in kaansarka naasku kugu dhaco markale.
- waxad qabtaa xad jidh ama dhibaato caafimaad oo keenaysa in cilaajka raajadu aanuu kuu ahayn ammaan
- waxaad horay u heshay shucaac soo gaadhay darbiga laabtaada.

Wada-jir, adiga iyo dhakhtarkaaga qallitaanka ayaa go'aamin doona qallitaanka sax ah iyada oo ku saleysan anfacyada, halisyada iyo waxa ad qiimeysid iyo doorbidkaaga.

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Ikhtiyaaro Qallitaan<br>— Maxaa la saarayaa inta lagu jiro qallitaanka? | ■ Dhakhtarkaaga qallitaanku wuxu saari doonaa qayb ka tirsan naaskaaga. Tan waxa lagu saari doonaa kaansarka iyo wareeg ah cad caafimaad qaba (qar) oo ku wareegsan kaansarka. | ■ Dhakhtarkaaga qalliinka ayaa kaa saari doona naaska oo dhan.<br>■ Waxaa laga yaabaa inaad awoodi karto inaad haysato ibta (ib) ibtaada. Tan waxaa lagu magacaabaa mastektomi-ka naas-nuujinta ah. Dhakhtarkaaga qaliinka iyo dhakhtarka qaliinka balaastigga ah ayaa go’aamin doona hadii tani kuu fiican tahay. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Muuqaalka naaska ka-dib qallitaan<br>— *Sidee buu naaskaygu u eekaan doonaa ka-dib marka an bogsado?* | ■ Waxa in badan kaaga soo hadhi doontaa muuqaalka dabiici ah ee naaskaaga.<br>■ Waxad calaamad nabar ku lahaan doonta naaskaaga.<br>■ Haddii dhakhtarkaaga qallitaanku saaro qaar ka mid ah nudahaaga limfiga, waxa kale oo ad calaamad nabar ku lahaan doontaa aagga kilkishaada. | ■ Waxa kaa lumi doonaa muuqaalka dabiiciga ah ee naaskaaga.<br>■ Haddii ad dooratid in aan laguu sameyn dib-u-dhiska naaska, waxad calaamad nabar ku lahaan doontaa meeshii u ku yaalay naaskaagu.<br>■ Haddii ad dooratid in laguu sameeyo dib-u-dhiska naaska, dhakhtarkaaga qallitaanka qurxinta ah ayaa kuu dhisi kara naas iyo ib naas oo cusub. Waxaad u baahan doonta dhowr qaliin si aad u dhammaystirto dib-u-dhiska. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Dib-dhiska Naaska<br>— *Ma u baahan doonaa dib-u-dhiska naaska?* | ■ Dib-u-dhiska naaska caadi ahaan loo baahna.<br>■ Yaraynta ama qalliinka kale ee naaska ayaad heli kara haddii naasahaagu u muuqdaan kuwo ka duwan shucaaca ka dib. | ■ Waxad dooran kartaa in laguu sameeyo dib-u-dhisid naas si dib loo dhiso naaskaaga. Dib u dhiska naasuhu wuxuu ku lug leeyahay qalliinno isdaba joog ah oo qaadan kara 1 ilaa 2 sano si loo dhammaystiro. Wakhtigu wuxu ku xidhnaan doonaa baahiyahaaga daweyn ee kale (cilaajka kiimikada, cilaajka raajada) ka-dib naas saarid dhammeystiran. Qallitaan kasta wuxu leeyahay halisyo una baahan yahay wakhti soo kaabasho. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Dareenka naaska ka-dib qallitaan<br>— *Sidee buu noqon doonaa dareenka naaskaygu ka-dib marka an bogsado?* | ■ Waxa in badan kaaga soo hadhi doona dareenka dabiici ah ee naaskaaga.<br>■ Waxad isbeddelo dareen ku yeelan doontaa meel u dhow jeexitaanadaada. | ■ Waxad isbeddelo dareen ku yeelan doonta meesha u ku ooli jiray naaskaagu. Waxay u badan tahay in maqaarku noqdo dareen la'aan.<br>■ Haddii ad dooratid in laguu sameeyo dib-u-dhiska naaska, naaskaaga iyo ibta naaskaagu ma lahaan doonaan wax ah kicin kacsi. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Joogitaanka cisbitaalka<br>— *Muddo intee leeg ayaan joogi doonaa cisbitaalka?* | ■ Badanaa waxaad aadi doontaa guriga isla maalinta qalliinka. | ■ Caadi ahaan waxaad aadi doontaa guriga isla maalinta qalliinka, xitaa dib-u-dhiska. Bukaanada qaar ayaa laga yaabaa inay u baahdaan inay isbitaalka joogaan 1 habeen. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Gororin dheecaan<br>— *Ma yeelan doonaa gororin dheecaan?* | ■ Guud ahaan looma baahna, wax ah gororin dheecaan. | ■ Waxa lagugu rakibi doonaa 1 ama ka badan oo ah gororin dheecaan si loo yareeyo in dheecaan ku ururasamo hoosta maqaarkaaga. Waxa ay gororinta dheecaanku kugu jiri doontaa 1 illaa 2 todobaad ama ka badan. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Wakhtiga Bogsashada<br>— *Muddo bogsasho oo intee leeg ayaan u baahan doonaa?*<br>— *Goorma ayaan ku laaban karaa firfircoonidaydii caadiga ahayd?* | ■ Waxad u baahan doontaa 3 illaa 7 maalmood oo ah bogsashdo ka-hor inta aanad ku laaban firfircoonidaadii caadiga ahayd. | ■ Waxad u baahan doontaa 3 illaa 6 todobaad oo ah bogsasho ka-hor inta aanad ku laaban firfircoonidaadii caadiga ahay.<br>■ Haddii waliba laguu sameeyo dib-u-dhiska naaska, wakhtiyada bogsashadu waxay ku xidhan yihiin ikhtiyaaradaada dib-u-dhiska. Waqtiyada soo-kabashada way kala duwan yihiin oo waxa uu u dhaxeeyaa 3 illaa 8 toddobaad. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Dhibaatooyin qallitaan (cilado)<br>— *Ma jiraan halisyo qallitaan?*<br>— *Waa maxay sababta ay halista ugu kala duwan yihiin qallitaanada kala duwan?*<br>— *Waa maxay halisyadu guud?* | ■ Qallitaankani wuu leeyahay halis cilado oo **sii yar** marka la barbardhigo qallitaan ah naas saarid dhammeystiran. Sababtu waa iyada oo qallitaankani ka gaaban yahay, isticmaalo dawo suuxin oo ka yar, oo lagu saaro cad naas oo ka yar oo u leeyahay jeexitaan ka yar ka naas saarid dhammeystiran.<br>■ Khataraha guud waxaa ka mid ah infekshin, dhibaatooyinka suuxinta, iyo dhiig bax.<br>■ Khataraha muddada-dheer ee aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah luminta dabacsanaanta gacanta, garabka ama labadaba. | ■ Qallitaankani wuxu leeyahay halis **sii weyn** xagga ciladaha marka la barbardhigo qayb-saarid naas. Sababtu waa iyada oo qallitaankani ka wakhti dheer yahay, isticmaalo dawo suuxin oo ka sii badan, oo lagu saaro cad naas oo ka sii badan oo u leeyahay jeexitaan ka sii weyn ka qayb-saarid naas.<br>■ Khataraha guud waxaa ka mid ah infekshin, dhibaatooyinka suuxinta, iyo dhiig bax.<br>■ Khataraha muddada-dheer ee aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah luminta dabacsanaanta gacanta, garabka ama labadaba. Haddii waliba laguu sameeyo dib-u-dhiska naaska, qallitaan kasta wuxu leeyahay halisyada kor lagu sharaxay. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Qallitaan kaansar naas oo dheeraad ah<br>— *Ma u baahan doonaa qallitaan dheeraad ah oo lagu saarayo cad naas?* | ■ Dib-u-goyn (qallitaan labaad oo lagu saarayo qaddar yar oo ah cadka naaska) ayaa loo baahan karaa haddii ad leedahay qar togan (positive) ama aan saafi ahayn (taasoo macnaheedu yahay cudurka oo dhaafsan meesha u dhakhtarka qallitaanku jaray) ama haddii qarku yahay mid aad u yar marka la fiiriyo nooca kaansar ee ad qabtid.<br>■ Noocan qallitan caadi ahaan waxa la qabtaa gudaha dhawr todobaad ka-dib qallitaankaaga ugu horeeya. | ■ Dib-u-goyn caadi ahaan looma baahdo ka-dib naas saarid dhammeystiran.<br>■ Haddii aad heshay dib u dhiska naasaha, waxaad u badan tahay in lagugu sameeyo qalliinno dheeri ah.<br>■ Wakhtiyada noocyadaas qallitaan waa mid isbeddelo leh. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Cilaajka Raajada<br>— *Ma u baahan doonaa cilaajka raajada?* | ■ Daaweynta shucaaca ayaa loo badinayaa in lagu taliyo.<br>■ Daaweynta shucaaca waxay caadi ahaan bilaabataa 4 ilaa 6 toddobaad qalliinka ka dib.<br>■ Waxaad u baahan doontaa inaad tagto daaweynta shucaaca maalin kasta isniinta illaa Jimcaha 4 ilaa 7 todobaad. Booqasho kastaa waxay qaadataa 15 illaa 20 daqiiqo.<br>■ Waxaa laga yaabaa inay saameyn kugu yeelato daaweynta shucaaca. Waxyeellooyinka caadiga ah waxaa ka mid noqon kara:<br>— daal muddo gaaban ah (daal)<br>— casaan gaaban ama raaxo daro ku ah aagga daweynta oo u eg gubasho qorax<br>— isbeddelada muddada-dheer ee ku dhaca midabka maqaarka naaska iyo qaab-dhismeedka naaskaaga<br>— halista sii kordheysa ee cudurka lymphedema<br>— waxyeelo kale oo dhif ah ayaa suuragal ah. Dhakhtarkaaga shucaaca kansarka ayaa dib ugu eegi doona kuwan si faahfaahsan. | ■ Uma sii badna in lagu taliyo cilaajka raajada, laakiin waxa jira wakhtiyo laga yaabo in loo baahdo. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Cilaajka Kiimikada<br>— *Ma u baahan doonaa cilaajka kiimikada?* | ■ Waxa laga yaabaa inad u baahatid cilaajka kiimikada ka-hor ama ka-dib qallitaanka. Tani ma aha mid ay lug ku leedahay nooca qallitaan ee ad dooratid. | |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Cilaajka ah "Endocrine" ama "antiestrogen" (cilaajka hormoonka)<br>— *Ma u baahan doonaa cilaajka hormoonka?* | ■ Bukaannada badankood waxay u baahan doonaan daaweynta endocrine qalliinka ka hor ama ka dib. | |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Baaritaanka kansarka naasaha<br>— *Ma u baahanahay baaritaanno naas oo joogto ah iyo raajada naasaha qalliinka ka dib?* | ■ Takhtarkaaga (dhakhaatiirta) waxay sameyn doonaan baaritaanno naas oo joogto ah (dareemid burooyin) si loo hubiyo calaamadaha kansarka soo noqda.<br>■ Waxaad u baahan doontaa mammogram joogto ah labada naasoodba. | ■ Haddii lagaa jaray hal naas oo keliya (hal mastektomi), waxaad u baahan doontaa baaritaanno naas oo joogto ah iyo raajada naasahaaga kuugu harsan. Haddii labada naasba lagaa jaray (mastectomy double), uma baahnid mammogram joogto ah. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |

# Isbarbardhigga Ikhtiyaaradaada (sii socda)

| | Qayb-saarid Naas oo Leh Cilaajka Raajada | Naas Saarid Dhammeystiran |
|---|---|---|
| Kansarka naasaha mustaqbalka iyo soo noqoshada maxalliga ah*<br>— *Kaansarku ma ku soo laaban karaa isla aagga ka-dib qallitaan?*<br><br>***Waxa laga yaabaa in halistu hadba si isu noqoto iyada oo ku xidhan xaaladdaada iyo kaansarkaaga.** | ■ **Fursada kansarka naasaha mustaqbalka waxa laga yaabaa inay xoogaa sare u kacdo boqolkiiba dhawr dhibcood. Khatarta guud ayaa weli ah mid aad u hooseysa.**<br><br>Kala hadal dhakhtarkaaga khatartaada gaarka ah. | ■ Fursada kansarka naasaha ee mustaqbalka ayaa ah kuwo yar maxaa yeelay naaska oo dhan waa lagaa jaray, laakiin halista ma noqoneyaan eber.<br><br>Dhakhtarkaaga kala hadal halistaada gaarka ah. |
| — Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | | |
| Noolaanshaha Guud<br>— *Sidee bay qallitaanadaasi u saameyaan suurtogalka noolaashahayga?* | ■ Ikhtiyaaradan qallitaano waxay leeyihiin natiijooyin noolaansho oo isku mid ah. Qalitaanka naasaha kuma caawineyso inaad ku noolaato wax ka dheer kan lumpectomy. | |

# Fahamkayga

| Su'aalo | Jawaabo |
|---|---|
| Haweenka loo sameeyay naas saarid dhammeystiran waxay noolaadaan muddo ka dheer inta ay noolaadaan haweenka loo sameeyay qayb-saarid naas oo leh cilaajka raajada.<br>❑ Run ❑ Been | **Been.** Dhererka wakhtiga ad noolaan doontid waa isku mid laba-da ikhtiyaarba. |
| Haweenka qaba lumpektomi ee halay daaweynta shucaaca ayaa wax yar u badan tahay inay yeeshaan kansarka naasaha mus-taqbalka marka la barbar dhigo haweenka helaya qalitaanka naasaha.<br>❑ Run ❑ Been | **Run.** Qayb-saarid naas waxa kaliya ay saaraysaa qayb ah naas-kaaga. Sababtoo ah waxaad haysaa in badan oo nudaha naaska ah inta lagu jiro lumpectomy, fursada kansarka naasaha mustaqbalka waxaa laga yaabaa inay xoogaa sare u kacdo boqolkiiba dhowr dhibcood. Khatarta guud ayaa weli ah mid aad u hooseysa. |
| Naas saarid dhammeystiran waxay si buuxda meesha uga saari doonta halista kaansarka naaska ee mustaqbalka.<br>❑ Run ❑ Been | **Been.** Naas saaridda dhammeystiran waxay in yar hoos u dhi-gaysaa halistaada kaansarka naaska ee mustaqbalka. Waxa laga yaabaa in halistaadu hadba si noqoto iyada oo ku xidhan xaaladd-aada iyo kaansarkaaga. Dhakhtarkaaga kala hadal xaaladdaada gaarka ah. |
| Waa kee nooca qallitaan ee u ku sii badan yahay halista dhibaa-tooyin (cilado) iyo bogsasho muddo dheer?<br>❑ Qayb-saarid naas ❑ Naas saarid dhammeystiran | **Naas saarid dhammeystiran.** Naas saaridda dhammeystiran waxa ku sii badan halista cilado iyo muddo bogsasho oo sii dheer. Qa-yb-saaridda naasku waxay leedahay halis cilado oo ka sii yar iyo muddo bogsasho oo ka sii gaaban. |
| Waa kee nooca qallitaan ee caadi ahaan raba cilaajka raajada ka-dib qallitaan?<br>❑ Qayb-saarid naas ❑ Naas saarid dhammeystiran | **Qayb-saarid naas.** Haweenka loo sameeyo qayb-saarid naas caadi ahaan waxay u baahan yihiin cilaajka raajada laga bilaabo qiyaas-tii 1 bil ka-dib qallitaanka. Haweenka loo sameeyo naas saarid dhammeystiran caadi ahaan uma baahna cilaajka raajada. |

# Doorbidkayga

| Su'aalo | Fikradahayga |
|---|---|
| Ma fahantay xulashooyinka qalliinka ee lagu sharxay buugyarahan? | |
| Marka ad ka fikirtid halisyada suurtogal ah, maxay yihiin cabsiyadaadu ama walaacyadaadu? | |
| Marka ad ka fikirtid labada ikhtiyaarba, maxay yihiin rajooyinkaagu ama hadafyadaadu? | |
| Si cad ma u fahamsan tahay anfacyada iyo halisyada ikhtiyaar kasta? Maxaa adiga kuugu muhiimsan? | |
| Labadan ikhtiyaar kee baa, wakhtigan, ad dareensan tahay inu sida ugu fiican ugu aadan yahay hadafyadaada daweyn? | |
| Ma jiraa wax kale oo laga yaabo inu kaa horjoogsado sameynta tan? | |
| Ma dareensan tahay inad haysatid taageero iyo macluumaad kugu filan? | |

**Doorbidkaygu ama doorashadaydu wakhtigan waa**

❑ qayb-saarid naas ❑ naas saarid dhammeystiran ❑ ma gaadhin go'aan

# Tallaabooyinka Xiga

## Su'aalo ad Weydiisid Dhakhtarkaaga Qallitaanka

Dhakhtarkaaga qallitaanka u qor wixii ah su'aalo ama walaacyo ee ku saabsan kaansarkaaga naaska ama ikhtiyaarada daweynta.

# Erey-bixin

- **Kilkisha (Axilla)**
  Tani waa hoosta cududdaada. Aaggani waa meesha xididada dhiiga iyo dareemeyaashu ay ka galaan kana baxaan cududda sare.
- **Qalliinka nudka kilkisha (Axillary node dissection)**
  Tani waa nidaam looga saarayo dhammaan qanjidhada hoose. Waxa lala qaban karaa saarid naas oo dhammeystiran ama qayb-saarid naas.
- **Dhib lahayn (Benign)**
  Tan macnaheedu waxa weeye aagga la baadhay ama cadka laga qaaday ma laha kaansar.
- **cad ka qaadis (Biopsy)**
  Kani waa hawlgal lagu soo saarayo qayb ah cad.
- **Kaansar**
  Kani waa koox cuduro ah oo dhaca marka unugyo aan caadi ahayn ay si aan xad lahayn u tarmaaan una gali karaan cadka u dhow.
- **Cilaajka kiimikada (Chemotherapy)**
  Cilaajka kiimikadu wuxu isticmaalaa dawo si loo burburiyo unugyada kaansarka. Dawooyinkan waxa caadi lahaan laga qaataa xidid (IV).
- **Cilaajka hormoonka (endocrine therapy)**
  Cilaajka hormoonku wuxu isticmaalaa dawo si loo daweeyo kaansarka ah xejiye estrogen (estrogen receptor positive). Dawooyinkani waa kiniino laga qaato afka.
- **Kaansar naas oo faafay (Invasive breast cancer)**
  Unugyada kansarka ee ku jira marinnada biyaha ama lobules-ka waxay ku koraan unugyada u dhow.
- **Dib ugu dhicitaan goob (Local recurrence)**
  Dib ugu dhicitaan goob waxay timaadaa marka kaansarka ku soo laabto meel u dhow goobtii kaansarkii hore.
- **Dheecaan Ururka Limfiga (Lymphedema)**
  waa barar unugyada jirka ah oo sababi kara dhaawaca unugyada ama ka saarida qanjirada. Sababta ugu weyn waa kansarka ama daaweynta kansarka, sida qalliinka, shucaaca, ama ka-goynta qanjidhada.

  Bararkan badanaa wuxuu ku dhacaa gacantaada ama naaskaaga. Kaliya dhinaca jirkaaga ay waxyeelladu soo gaartay ama noodhadh laga saaray ayaa saameyn ku yeelan doona. Lymphedema wuxuu isla markiiba soo bixi karaa qalliinka kadib ama sanado badan kadib.



© Allina Health System

**Barariddu waxay ku dhici kartaa cududda ama laabta.**

- **Nudaha limfiga (Lymph nodes)**
  Waxay u hawlgalaan sida shaandhooyin oo ay jidhka ka saaraan unugyada dhintay iyo bakteeriya (jeermiga) oo ka ilaaliyaan dhiigga. Kaansarka naasku wuxu ku fidi karaa nudaha limfiga ee kilkisha.

# Erey-bixin (sii socda)

- **Dhib leh (Malignant)**
  Tan macnaheedu waxa weeye aagga la baadhay ama cadka la qaaday ayaa leh unugyo kaansar.
- **Qar (Margin)**
  Qarku waa wareeg ah cad naas oo caafimaad qaba oo ku wareegsan kaansarka la saarayo inta lagu jiro qallitaanka.
- **Cilaajka kiimikada ee hormariska ah (Neoadjuvant chemotherapy)**
  Kani waa nooc cilaaj kiimiko oo qofka la siiyo ka-hor qallitaanka. Waxa marmarka qaarkood lagu taliyaa marka u jiro kaansar faafay iyada oo la isku dayayo in la yareeyo burooyinka ka-hor qallitaanka.
- **Dib-u-goyn (Re-excision)**
  Dib-u-goyntu waa qallitaan labaad oo lagu saarayo qaddar yar oo ah cadka naaska. Tani waxay dhacdaa marka qallitaanka koobaad aan lagu saarin qar leh ballac lagu qanci karo.
- **Cilaajka raajada**
  Cilaajka raajadu wuxu isticmaalaa shucaac raajo oo tamar sare leh (high-energy X-rays) si loo burburiyo unugyada kaansarka.
- **Nudka Sentinel (Sentinel node)**
  Nudka sentinel waa nudka limfiga ee ugu horeeya ee gororiya aagga jidhkaaga ee leh kaansarka. Haddii unugyada kaansarku ay bilaabeen inay ka soo fuqaan kaansarkii asalka ahaa, waxa shaandheyn doonaa nudka sentinel.
- **Cad ka qaadista nudka sentinel (Sentinel node biopsy)**
  Waa ka-qaadista unugga qanjirada 'sentinel lymph node biopsy' si loo ogaado haddii ay ku jiraan unugyo kansar ah. Qanjirka 'sintinel lymph node (yada) waa nuguska ugu horreeya ee nuugaya naaska.
- **Buro (Tumor)**
  Kani waa kuus cad oo aan caadi ahayn oo yimaada marka ay unugyadu isu qaybiyaan si ka badan intii laga rabay ama aanay dhiman markii ay ahayd inay dhintaan.

# Illo

- **Allina Health**
  allinahealth.org
- **American Cancer Society (Ururka Kaansarka ee Maraykanka)**
  cancer.org
- **"Dr. Susan Love's Breast Book" (Buugga Naaska ee Dr. Susan Love) ee ay qortay Susan Love, MD**
- **National Cancer Institute (Machadka Kaansarka ee Qaranka)**
  cancer.gov
- **National Comprehensive Cancer Network (Shabakadda Kaansarka ee Dhammeystiran ee Qaranka)**
  nccn.org

allinahealth.org

© 2023 ALLINA HEALTH SYSTEM. TM – A TRADEMARK OF ALLINA HEALTH SYSTEM
OTHER TRADEMARKS USED ARE OWNED BY THEIR RESPECTIVE OWNERS
THIS DECISION AID DOES NOT REPLACE MEDICAL OR PROFESSIONAL ADVICE; IT IS ONLY A GUIDE.

can-somali-ah-78287 (6/23)